

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

عَنِ ابْنِ عُمَرَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمَا قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: ((بُنِيَ الْإِسْلَامُ عَلَى خَمْسٍ شَهَادَةِ أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ وَأَنَّ مُحَمَّدًا رَسُولُ اللَّهِ، وَإِقَامِ الصَّلَاةِ، وَإِيتَاءِ الزَّكَاةِ، وَالْحَجِّ، وَصَوْمِ رَمَضَانَ)).

8. Ibnu Cumar Allaha ka raali noqdee wuxuu yiri: Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri: Islamka shan ayuu ku dhisan yahay , in la qiro in Ilaah mooye Ilaah kale uusan jirin Muxammedna yahay Rasuulkii Alle ﷺ, Salaadana in la hagaajiyo, Sakadana la bixiyo, Xajkana lasoo xajiyo, Bisha Ramadaana la soomo.<sup>1</sup>

---

<sup>1</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 8, Saxiix

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: ((الْإِيمَانُ بِضْعٌ وَسِتُّونَ شُعْبَةً، وَالْحَيَاءُ شُعْبَةٌ مِنَ الْإِيمَانِ)).

9. Abii Hureyra Allaha ka raali noqdee wuxuu ka waryay Nabiga ﷺ inuu yiri: Iimaanka waa dhowr iyo lixdan qeybood, xishoodkana waa qeeb imaanka kamida<sup>2</sup>.

عَنْ عَبْدِ اللَّهِ بْنِ عَمْرٍو رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمَا عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: ((الْمُسْلِمُ مَنْ سَلِمَ الْمُسْلِمُونَ مِنْ لِسَانِهِ وَيَدِهِ، وَالْمُهَاجِرُ مَنْ هَجَرَ مَا نَهَى اللَّهُ عَنْهُ)).  
[طرفه 6484، تحفة 8834-1/10].

10. Cabdullahi Ibnu Camr Allaha ka raali noqdee wuxuu ka waryay Nabiga ﷺ inuu yiri: Muslimka waa kan ay nabad galaan muslimiinta carabkiisa iyo. gacantiisa, kan hijroodayna kan ka taga wuxuu Alle ka reebay.<sup>3</sup>

---

<sup>2</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 9, Saxiix

<sup>3</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 10, Saxiix

عَنْ أَبِي مُوسَى رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ قَالَ قَالُوا يَا رَسُولَ اللَّهِ أَيُّ الْإِسْلَامِ أَفْضَلُ قَالَ: ((مَنْ سَلِمَ الْمُسْلِمُونَ مِنْ لِسَانِهِ وَيَدِهِ)).  
[تحفة 9041].

11. Abii Muusa Allaha ka raali noqdee wuxuu yiri: saxaabadii waxay yiraahdeen: Rasuulkii Allow ﷺ Islamka keeba ugu fadli badan? Wuxuu yiri: ruuxii ay muslimiinta ka nabad galaan carabkiisa iyo gacantiisa<sup>4</sup>.

عَنْ عَبْدِ اللَّهِ بْنِ عَمْرٍو رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمَا أَنَّ رَجُلًا سَأَلَ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ أَيُّ الْإِسْلَامِ خَيْرٌ قَالَ: ((تُطْعِمُ الطَّعَامَ، وَتَقْرَأُ السَّلَامَ عَلَى مَنْ عَرَفْتَ وَمَنْ لَمْ تَعْرِفْ)).  
[طرفاه 28، 6236، تحفة 8927].

12. Cabdullaahi Bin Camr Allaha ka raali noqdee wuxuu waryay in nin uu su'aalay Nabiga ﷺ Islamka keeba ugu qeer badan? Wuxuuna yiri: kan dadka cunno ku quudiyo, dadkana salaamo cidda uu garanaayo iyo cidda aanu garaneenin<sup>5</sup>.

عَنْ أَنَسٍ عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: ((لَا يُؤْمِنُ أَحَدُكُمْ حَتَّى يُحِبَّ لِأَخِيهِ مَا يُحِبُّ لِنَفْسِهِ)).

---

<sup>4</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 11, Saxiix

<sup>5</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 12, Saxiix

[تحفة 1239 ، 1153].

13. Anas wuxuu ka waryay Nabiga ﷺ inuu yiri: Iimaan lagama helin axadkiina ilaa uu la jeclaado walaalkiisa waxa uu nafsadiisa la jecelyahay<sup>6</sup>.

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: ((فَوَالَّذِي نَفْسِي بِيَدِهِ لَا يُؤْمِنُ أَحَدُكُمْ حَتَّىٰ أَكُونَ أَحَبَّ إِلَيْهِ مِنْ وَالِدِهِ وَوَلَدِهِ)).

14. Abii Hureyra Allaha ka raali noqdee wuxuu ka waryay Rasuulkii Alle ﷺ inuu yiri: Allaha ay nafsadeeda gacantiisa ku jirtaa ku dhaartaye iimaan lagama helin axadkiina ilaa aan ka ahaado midka uu ugu jaceylka badan yahay waalidkiisa iyo wiilkiisa.<sup>7</sup>

---

<sup>6</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 13, Saxiix

<sup>7</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 14, Saxiix

عَنْ أَنَسٍ قَالَ: قَالَ النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: ((لَا يُؤْمِنُ أَحَدُكُمْ حَتَّىٰ أَكُونَ أَحَبَّ إِلَيْهِ مِنْ وَالِدِهِ وَوَالِدِهِ وَالنَّاسِ أَجْمَعِينَ)).

15. Anas wuxuu yiri: Nabiga ﷺ wuxuu yiri: Allaha ay nafsadeeda gacantiisa ku jirtaa ku dhaartaye iimaan lagama helin axadkiina ilaa aan ka ahaado midka uu ugu jaceylka badan yahay waalidkiisa iyo wiilkiisa iyo dadka oo dhan.<sup>8</sup>

عَنْ أَنَسٍ عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: ((ثَلَاثٌ مَنْ كُنَّ فِيهِ وَجَدَ حَلَاوَةَ الْإِيمَانِ أَنْ يَكُونَ اللَّهُ وَرَسُولُهُ أَحَبَّ إِلَيْهِ مِمَّا سِوَاهُمَا، وَأَنْ يُحِبَّ الْمَرْءَ لَا يُحِبُّهُ إِلَّا لِلَّهِ، وَأَنْ يَكْرَهُ أَنْ يَعُودَ فِي الْكُفْرِ كَمَا يَكْرَهُ أَنْ يُقَذَّفَ فِي النَّارِ)).

16. Anas wuxuu ka waryay Nabiga ﷺ inuu yiri: ruuxii sadax ay u kulmaan wuxuu helay iimaanka macaankiisa, inuu ahaado Alle iyo Rasuulkiisa ﷺ mid ka jeclaado wixii kasoo hara, iyo inuu qofka u jeclaado kaliya Alle dartiisa, iyo inuu necbeysto inuu ku laabto gaalnimo siduu u necebyahay in dab lagu tuuro.<sup>9</sup>

---

<sup>8</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 15, Saxiix

<sup>9</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 16, Saxiix

عَبْدُ اللَّهِ بْنُ جَبْرِ قَالَ: سَمِعْتُ أَنَسًا عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: ((آيَةُ الْإِيمَانِ حُبُّ الْأَنْصَارِ، وَآيَةُ النِّفَاقِ بُغْضُ الْأَنْصَارِ)).

17. Cabdullaahi Bin Jubeyr wuxuu yiri waxaan maqlay Anas oo ka warinaayo Nabiga ﷺ uu yiri: Calaamada iimaanka lagu garto waa in la jeclaado Ansaarta, calaamada munaafaqnimada lagu gartana waa la naco Ansaarta. <sup>10</sup>

عِبَادَةَ بَنِ الصَّامِتِ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ وَكَانَ شَهِدَ بَدْرًا، وَهُوَ أَحَدُ الثُّقَبَاءِ لَيْلَةَ الْعَقَبَةِ - أَنْ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ وَحَوْلَهُ عِصَابَةٌ مِنْ أَصْحَابِهِ: ((بَايَعُونِي عَلَى أَنْ لَا تُشْرِكُوا بِاللَّهِ شَيْئًا، وَلَا تَسْرِقُوا، وَلَا تَزْنُوا، وَلَا تَقْتُلُوا أَوْلَادَكُمْ، وَلَا تَأْتُوا بِبُهْتَانٍ تَفْتَرُونَهُ بَيْنَ أَيْدِيكُمْ وَأَرْجُلِكُمْ، وَلَا تَعُصُوا فِي مَعْرُوفٍ، فَمَنْ وَفَى مِنْكُمْ فَأَجْرُهُ عَلَى اللَّهِ، وَمَنْ أَصَابَ مِنْ ذَلِكَ شَيْئًا فَعُوقِبَ فِي الدُّنْيَا فَهُوَ كَفَّارَةٌ لَهُ، وَمَنْ أَصَابَ مِنْ ذَلِكَ شَيْئًا ثُمَّ سَتَرَهُ اللَّهُ، فَهُوَ إِلَى اللَّهِ إِنْ شَاءَ عَفَا عَنْهُ، وَإِنْ شَاءَ عَاقَبَهُ)). فَبَايَعْنَاهُ عَلَى ذَلِكَ.

18. Cubaada Bin Saamit Allaha ka raali noqdee oo ka mid ahaa saxaabadii ka qeyb gashay dagaalkii badar, wuxuuna kamid ahaa nabad doonadii u timid Nabiga ﷺ habeenkii caqabada wuxuu ka waryay in Nabiga ﷺ uu yiri: asagoo hareerhiisana joogan qaar kamida asxaabtiisa ii balan qaada inaadan Alle ku gaaloobeynin, inaadan wax xadeynin, inaadan zineysaneynin, inaadan caruurtiina u dileynin faqri dartiis, inaadan la imaaneynin been abuur nafsad ahaantiina, inaadan ku caasineynin madaxdiina, qofkii intaas oofiyo ajarkiisa Alle ﷻ xagiisa ayuu ka helaaya, qofkii ku dhaco intaasi la soo sheegay qaar kamida oo ay gaalnimada ugu horeyso ciqaabtiisa aduunka ayuu ku helaaya kafaaro gud bayna u tahay( lakiin gaalnimada ruuxi ku dhinto waligiisa ayuu naarta ku waari doona cafisna maleh) qofkii intaas

---

<sup>10</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 17, Saxiix

lasoo sheegay ku dhaco shay kamida kadibna uu Alle asturo intuu aduunka joogo Alle asagaa cafin karo asagaana ciqaabi karo maalinta Qiyaame. <sup>11</sup>

عَنْ أَبِي سَعِيدٍ الْخُدْرِيِّ أَنَّهُ قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: ((يُوشِكُ أَنْ يَكُونَ خَيْرَ مَالِ الْمُسْلِمِ غَنَمٌ يَتَّبَعُ بِهَا شَعَفَ الْجِبَالِ وَمَوَاقِعَ الْقَطْرِ، يَفْرُ بِدِينِهِ مِنَ الْفِتَنِ)).

19. Abii Saciid Al-Qudrii wuxuu yiri: Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri: waxaa dhici doonto inuu ahaado maalka muslimka ugu qeyrka badan ariga oo uu ku raacayo buuraha dushooda iyo meelaha dadka ay dagaan ka baxsan, asagoo ka cararaayo fitanta.<sup>12</sup>

عَنْ عَائِشَةَ قَالَتْ: كَانَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ إِذَا أَمَرَهُمْ أَمْرَهُمْ مِنَ الْأَعْمَالِ بِمَا يُطِيقُونَ قَالُوا إِنَّا لَسْنَا كَهَيْئَتِكَ يَا رَسُولَ اللَّهِ، إِنَّ اللَّهَ قَدْ غَفَرَ لَكَ مَا تَقَدَّمَ مِنْ ذَنْبِكَ وَمَا تَأَخَّرَ. فَيَغْضَبُ حَتَّى يُعْرِفَ الْعُضْبُ فِي وَجْهِهِ ثُمَّ يَقُولُ: ((إِنَّ أُنْقَاكُمْ وَأَعْلَمَكُمْ بِاللَّهِ أَنَا)). [تحفة 17074 - 1/12]

20. Caa'isha Allaha ka raali noqde waxay tiri: Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu ahaa mid amro asxaabtiisa camal ay kari karaan, waxay dhihi jireen: sidaado kale ma nihin Rasuulkii Allow ﷺ, adiga dambigada hore iyo kaadi dambe waala dhaafay, wuuna xanaagi jiray Nabiga ﷺ ilaa wajigiisa laga garto xanaaga,

---

<sup>11</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 18, Saxiix

<sup>12</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 19, Saxiix

kadibna wuxuu dhihi jiray: kan idin kugu cabsi badan idin kugu aqoonta badan Alle waa aniga<sup>13</sup>.

عَنْ أَنَسٍ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: ((ثَلَاثٌ مَنْ كُنَّ فِيهِ وَجَدَ حَلَاوَةَ الْإِيمَانِ مَنْ كَانَ اللَّهُ وَرَسُولُهُ أَحَبَّ إِلَيْهِ مِمَّا سِوَاهُمَا، وَمَنْ أَحَبَّ عَبْدًا لَا يُحِبُّهُ إِلَّا لِلَّهِ، وَمَنْ يَكْرَهُ أَنْ يَعُودَ فِي الْكُفْرِ بَعْدَ إِذْ أَنْقَذَهُ اللَّهُ، كَمَا يَكْرَهُ أَنْ يُلْقَى فِي النَّارِ)).  
[أطرافه 16، 6041، 6941، تحفة 1255].

21. Anas Bin Maalik Allaha ka raali noqdee wuxuu ka waryay Nabiga ﷺ inuu yiri: sadax qofkeey u kulmaan wuxuu helay iimaanka macaankiisa, qofkii ahaado mid Alle ﷻ iyo Rasuulkiisa ﷺ inuu wax walbo ka jecelyahay, Qofkii adoon Alle dartiisa u jecelyahay, iyo inuu naco inuu gaalnimo u laabo kadib markuu Alle ka badbaadiyay, siduu u nacaayo in naarta lagu tuuro.<sup>14</sup>

عَنْ أَبِي سَعِيدٍ الْخُدْرِيِّ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: ((يَدْخُلُ أَهْلُ الْجَنَّةِ الْجَنَّةَ، وَأَهْلُ النَّارِ النَّارَ، ثُمَّ يَقُولُ اللَّهُ تَعَالَى أَخْرَجُوا مَنْ كَانَ فِي قَلْبِهِ مِثْقَالُ حَبَّةٍ مِنْ خَرْدَلٍ مِنْ إِيْمَانٍ. فَيُخْرَجُونَ مِنْهَا قَدْ اسْوَدُّوا فَيُلْقَوْنَ فِي نَهْرِ الْحَيَاةِ - أَوْ الْحَيَاةِ، شَكَّ مَالِكٌ - فَيَنْبُتُونَ كَمَا تَنْبُتُ الْحَبَّةُ فِي جَانِبِ السَّيْلِ، أَلَمْ تَرَ أَنَّهَا تَخْرُجُ صَفْرَاءَ مُلْتَوِيَةً)). قَالَ وَهَيْبٌ حَدَّثَنَا عَمْرُو: ((الْحَيَاةِ)).

وَقَالَ: ((خَرْدَلٍ مِنْ حَيْرٍ)).

---

<sup>13</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 20, Saxiix

<sup>14</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 21, Saxiix

[أطرافه 4581، 4919، 6560، 6574، 7438، 7439، تحفة 4407].

22. Abii Saciid Al-Qudrii Allaha ka raali noqdee wuxuu ka waryay Nabiga ﷺ inuu yiri: Ahlu Jannaha Jannadooda ayay galaayaan Ahlu Naarkana Naartooda ayay galaayan, kadib Alle wuxuu leeyahay kasoo saara Naarta qofkii qalbigiisa uu ku jiro in yar oo xabad qardal oo iimaan ah, waana laga soo saara Naarta ayagoo madoobaaday dhuxuloobay, waxaana lagu tuura wabi la yiraahdo wabigii nolosha, Maalik wuu shakiyay, waxayna uso dhalanaayan sida cayadu ay ugasoo dhalato dadka halka uu maro dhinaciisa, miyaadan arkin cayadu iney uso dhalato ayadoo jaalo ah misna marmaroorsan.<sup>15</sup>

عَنْ أَبِي أَمَامَةَ بْنِ سَهْلٍ أَنَّهُ سَمِعَ أَبَا سَعِيدٍ الْخُدْرِيَّ يَقُولُ: قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: ((بَيْنَا أَنَا نَائِمٌ رَأَيْتُ النَّاسَ يُعْرَضُونَ عَلَيَّ، وَعَلَيْهِمْ قُمْصٌ مِنْهَا مَا يَبْلُغُ الثُّدِيَّ، وَمِنْهَا مَا دُونَ ذَلِكَ، وَعُرِضَ عَلَيَّ عُمَرُ بْنُ الْخَطَّابِ وَعَلَيْهِ قَمِيصٌ يَجْرُهُ)). قَالُوا: فَمَا أَوْلَتْ ذَلِكَ يَا رَسُولَ اللَّهِ؟ قَالَ: ((الِدِّينَ)).

[أطرافه 3691، 7008، 7009، تحفة 3961].

23. Abii Umaama Bin Sahal waxaa laga waryay inuu maqlay Abaa Saciid Al-qudrii oo leh: Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri: anoo jiifo ayaa waxaa riyo leygu tusay dad qamiisyo wataan qaarkood qamiiskooda shafka ayuu u joogay qaarka intaas wax ka hooseeya waxaa leyso bandhigay Cumar Bin Khataab Allaha ka raali noqde asagoo qamiis dheer wato kaaso dhulka jiidaaye, waxay

---

<sup>15</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 22, Saxiix

yiraahdeen asxaabtii maxaa ku fasirtay Rasuulkii Allow? Wuxuuna yiri:  
waxaan ku fasiray Diinta.<sup>16</sup>

عَنْ سَالِمِ بْنِ عَبْدِ اللَّهِ عَنْ أَبِيهِ أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ مَرَّ عَلَى رَجُلٍ مِنَ الْأَنْصَارِ  
وَهُوَ يَعِظُ أَخَاهُ فِي الْحَيَاءِ، فَقَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: ((دَعُهُ فَإِنَّ الْحَيَاءَ مِنَ  
الْإِيمَانِ)).

[طرفه 6118، تحفة 6913].

24. Saalim Bin Cabdillaahi wuxuu aabihiisa ka waryay in Rasuulkii Alle ﷺ  
uu maalin soo ag maray nin kamid ah ansaarta asagoo walaalkiisa ka  
waaninaayo inuusan xishoonin, Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri: daay maxaa  
yeelay xishoodka iimaanka ayuu ka mid yahay.<sup>17</sup>

عَنْ ابْنِ عُمَرَ أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: ((أَمَرْتُ أَنْ أَقَاتِلَ النَّاسَ حَتَّى يَشْهَدُوا أَنْ  
لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ وَأَنَّ مُحَمَّدًا رَسُولُ اللَّهِ، وَيُقِيمُوا الصَّلَاةَ، وَيُؤْتُوا الزَّكَاةَ، فَإِذَا فَعَلُوا ذَلِكَ عَصَمُوا  
مِنِّي دِمَاءَهُمْ وَأَمْوَالَهُمْ إِلَّا بِحَقِّ الْإِسْلَامِ، وَحِسَابُهُمْ عَلَى اللَّهِ)).

[تحفة 7422-1/13].

25. Cumar wuxuu ka waryay Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri: waxaa ley amray  
inaan la dagaalamo dadka ilaa ay ka qiraan in Ilaah mooye Alle kale uusan  
jirin muxammedna Rasuulkii Alle ﷺ, salaadana ay oogaan, zakadana ay la  
yimaadan, haddii ay sidaasi sameeyan waxaa iga badbaadayo dhiigooda iyo

---

<sup>16</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 23, Saxiix

<sup>17</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 24, Saxiix

maalkooda marka laga reebo islamka xaqiisa xisaabtoodana Alle ﷺ xagiisa ayay ahaatay.<sup>18</sup>

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ سئِلَ أَيُّ الْعَمَلِ أَفْضَلُ فَقَالَ: ((إِيمَانٌ بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ)). قِيلَ ثُمَّ مَاذَا قَالَ: ((الْجِهَادُ فِي سَبِيلِ اللَّهِ)). قِيلَ ثُمَّ مَاذَا قَالَ: ((حَجٌّ مَبْرُورٌ)).

[طرفه 1519، تحفة 13101].

26. Abii Hureyra wuxuu ka waryay in Rasuulkii Alle ﷺ la su'aalay camal keeba ugu fadli badan? Wuxuu yiri: In Ilaahey ﷺ la rumeeyo iyo Rasuulkiisa ﷺ, kadibna asxaabtii waxay yiraahdeen: maxaa xega? Wuxuuna yiri: in Ilaahey ﷺ dartiisa loo jihaado, kadibna asxaabtii waxay yiraahdeen: maxaa xega? Wuxuuna yiri: Xajka la aqbalay.<sup>19</sup>

عَنْ سَعْدِ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ أَعْطَى رَهْطًا وَسَعْدُ جَالِسٌ، فَتَرَكَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ رَجُلًا هُوَ أَعْجَبُهُمْ إِلَيَّ فَقُلْتُ يَا رَسُولَ اللَّهِ مَا لَكَ عَنْ فُلَانٍ فَوَاللَّهِ إِنِّي لَأَرَاهُ مُؤْمِنًا. فَقَالَ: ((أَوْ مُسْلِمًا)). فَسَكَتُ قَلِيلًا، ثُمَّ غَلَبَنِي مَا أَعْلَمُ مِنْهُ فَعُدْتُ لِمَقَالَتِي فَقُلْتُ مَا لَكَ عَنْ فُلَانٍ فَوَاللَّهِ إِنِّي لَأَرَاهُ مُؤْمِنًا فَقَالَ: ((أَوْ مُسْلِمًا)). ثُمَّ غَلَبَنِي مَا أَعْلَمُ مِنْهُ فَعُدْتُ لِمَقَالَتِي وَعَادَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ثُمَّ قَالَ: ((يَا سَعْدُ، إِنِّي لَأَعْطِي الرَّجُلَ وَغَيْرَهُ أَحَبُّ إِلَيَّ مِنْهُ، خَشِيَةَ أَنْ يَكْبَهُ اللَّهُ فِي النَّارِ)).

[طرفه 1478، تحفة 3891-1/14].

27. Sacad Allaha ka raali noqdee wuxuu ka waryay Rasuulkii Alle ﷺ inuu qeybiyay xoolo saxaabadii qaar kamida u qeybiyay xoolo Sacadna wuu fadhiyay, Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu ka tagay nin aad ii cajabiyay, waxaan iri:

---

<sup>18</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 25, Saxiix

<sup>19</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 26, Saxiix

Rasuulkii Allow ﷺ hebel maxaad ka leedahay walahi baan ku dhaartaye waxaan u arkaa Mu'min, Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri: mase Muslim? Inyar baan aamusay kadibna waxaa iga xoog badiyay wixii aan ninkaasi ka aqaanay waxaana ku laabtay inaan weydiinaayo Rasuulkii Alle ﷺ, waxaan iri: Rasuulkii Allow ﷺ hebel maxaad ka leedahay walahi baan ku dhaartaye waxaan u arkaa Mu'min, Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri: mase Muslim? Inyar baan aamusay kadibna waxaa iga xoog badiyay wixii aan ninkaasi ka aqaanay waxaana ku laabtay inaan weydiinaayo Rasuulkii Alle ﷺ, kadibna wuxuu i yiri: Sacadoow aniga qof ayaan wax siiyay waliba anigoo qofkaas ruux kale uga jaceyl badanahay, anigoo ka baqaayo inuu Alle ﷻ naarta waji waji ugu tuuro.<sup>20</sup>

عَنْ عَبْدِ اللَّهِ بْنِ عَمْرٍو رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمَا أَنَّ رَجُلًا سَأَلَ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ أَيُّ الْإِسْلَامِ خَيْرٌ قَالَ: ((تَطْعِمُ الطَّعَامَ، وَتَقْرَأُ السَّلَامَ عَلَى مَنْ عَرَفْتَ وَمَنْ لَمْ تَعْرِفْ)).  
[طرفاه 28، 6236، تحفة 8927].

28. Cabdullaahi Bin Camr Allaha ka raali noqdee wuxuu waryay in nin uu su'aalay Nabiga ﷺ Islamka keeba ugu qeer badan? Wuxuuna yiri: kan dadka cunno ku quudiyo, dadkana salaamo cidda uu garanaayo iyo cidda aanu garaneenin<sup>21</sup>.

---

<sup>20</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 27, Saxiix

<sup>21</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 28, Saxiix

عَنِ ابْنِ عَبَّاسٍ قَالَ: قَالَ النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: ((أُرِيتُ النَّارَ فَإِذَا أَكْثَرُ أَهْلِهَا النِّسَاءُ يَكْفُرْنَ)). قِيلَ أَيَكْفُرْنَ بِاللَّهِ قَالَ: ((يَكْفُرْنَ الْعَشِيرَ، وَيَكْفُرْنَ الْإِحْسَانَ، لَوْ أَحْسَنْتَ إِلَى إِحْدَاهُنَّ الدَّهْرَ ثُمَّ رَأَتْ مِنْكَ شَيْئًا قَالَتْ مَا رَأَيْتُ مِنْكَ خَيْرًا قَطُّ)).

[أطرافه 431، 748، 1052، 3202، 5197، تحفة 5977].

29. Ibnu Cabaas wuxuu yiri: Nabiga ﷺ wuxuu yiri: Naartii ayaan soo arkay habeenkii ley dheelmiyay Israa' Wal Micraaj, dadka ahlu naarka ah waxay u badnaayeen haween kufriyay, asxaabtii waxay yiraahdeen: ma Alle ﷻ ayay ku kufriyeen? Wuxuu yiri: waxay ku kufriyaan nimankooda, ixsaanka ayay ku kufriyaan, haddii midkood aad wanaajisid waqti zamanka kadibna ay kugu aragto haweeneyda qalad yar waxay ku dhaheysaa waligey qeyr kaama arkin.<sup>22</sup>

عَنْ أَبِي دَرٍّ قَالَ: إِنِّي سَأَبْتُ رَجُلًا، فَعَيَّرْتُهُ بِأُمَّهِ، فَقَالَ لِي النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: ((يَا أَبَا دَرٍّ أَعَيَّرْتَهُ بِأُمَّهِ إِنَّكَ أَمْرٌ فِيكَ جَاهِلِيَّةٌ، إِخْوَانُكُمْ خَوْلُكُمْ، جَعَلَهُمُ اللَّهُ تَحْتَ أَيْدِيكُمْ، فَمَنْ كَانَ أَحُوهُ تَحْتَ يَدِهِ فَلْيُطْعِمْهُ مِمَّا يَأْكُلُ، وَلْيُلْبِسْهُ مِمَّا يَلْبَسُ، وَلَا تُكَلِّفُوهُمْ مَا يَغْلِبُهُمْ، فَإِنْ كَلَّفْتُمُوهُمْ فَأَعِينُوهُمْ)).

[طرفاه 2545، 6050، تحفة 11980].

30. Abaa Darr wuxuu yiri: nin ayaan is caaynay kadibna hooyadiis ayaan ku ceebeyay(ninka ay is caayeen waa Bilaal wuxuuna yiri: hooyada way madowdahay) Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri: Abaa Darrow ma hooyadiis ayaad ku caayday? Adiga waxaa tahay qof ay ku jirto jaahilnimo, kuwa adoomada idin ah waa walaalihiin, Alle ﷻ ayaa idin hoos keenay, qofkii qof

<sup>22</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 29, Saxiix

walaalkiisa ah gacanta ku haayo ha siiyo waxa uu cunaayo, iyo labiska uu xiranaayo, hana ku kalifina wax aysan awoodin, hadaadse ku kaliftaan caawiya.<sup>23</sup>

عَنْ أَبِي بَكْرَةَ قَالَ إِنِّي سَمِعْتُ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَقُولُ: ((إِذَا التَّقَى الْمُسْلِمَانِ بِسَيْفَيْهِمَا فَالْقَاتِلُ وَالْمَقْتُولُ فِي النَّارِ)). فَقُلْتُ يَا رَسُولَ اللَّهِ هَذَا الْقَاتِلُ فَمَا بَالُ الْمَقْتُولِ قَالَ: ((إِنَّهُ كَانَ حَرِيصًا عَلَيَّ فَتَلَّ صَاحِبِهِ)).

31. Abii Bakra wuxuu yiri: waxaan maqlay Rasuulkii Alle ﷺ oo leh: haddii ay kulmaan labo muslim ah seyfahooda kan wax dilay iyo kan la dilay naarta ayay galaayan, waxaan iri: Rasuulkii Allow ﷺ kan wax dilay waan garanay kan la dilayna? Rasuulkii Alle ﷺ Midka la dilay wuxuu ku dadaalaayay inuu kan kale walaalkiisa ah uu dilo.<sup>24</sup>

عَنْ عَبْدِ اللَّهِ قَالَ لَمَّا نَزَلَتْ: ﴿الَّذِينَ ءَامَنُوا وَلَمْ يَلْبِسُوا إِيمَانَهُمْ بِظُلْمٍ أُولَٰئِكَ لَهُمُ الْأَمْنُ وَهُمْ مُهْتَدُونَ﴾ [سورة الأنعام]

قَالَ أَصْحَابُ رَسُولِ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ أَيُّنَا لَمْ يَظْلِمْ فَأَنْزَلَ اللَّهُ: ﴿إِنَّ الشِّرْكَ لَظُلْمٌ عَظِيمٌ﴾ [سورة القمان]

[أطرافه 3360، 3428، 3429، 4629، 4776، 6918، 6937، تحفة 9420].

32. Cabdullahi wuxuu yiri: markii ay soo dagatay Ayadan:

<sup>23</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 30, Saxiix

<sup>24</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 31, Saxiix

Kuwa Xaqa Rumeeyey oon ku Dheehin Iimaankooda Dulmi (Gaalimo)  
kuwaasaa Nabadgalto u Sugnaatay Hanuunsanna.

-Surah Al-An'am, Ayah 82, asxaabtii waxay weydiyeen Rasuulkii Alle ﷺ  
yaanan nafsadiisa dulminin oo aanan macaasi iyo dambe galin? Kadibna Alle  
ﷻ ayaa wuxuu soo dajiyay Ayadan kale: , Shirkigu waa dulmi weyn.

-Surah Luqman, Ayah 13.<sup>25</sup>

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: ((آيَةُ الْمُنَافِقِ ثَلَاثٌ إِذَا حَدَّثَ كَذَبَ، وَإِذَا  
وَعَدَ أَخْلَفَ، وَإِذَا أُؤْتِمِنَ خَانَ)).

[أطرافه 2682، 2749، 6095، تحفة 14341].

33. Abii Hureyra Allaha ka raali noqdee wuxuu ka waryay Nabiga ﷺ inuu  
yiri: calaamadaha munaafaqa waa sadax, markii uu sheekeynaayo been ayuu  
sheega, markuu balan qaado wuu ka baxaa, markii la aamino wuu  
qayaama.<sup>26</sup>

عَنْ عَبْدِ اللَّهِ بْنِ عَمْرٍو أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: ((أَرْبَعٌ مَنْ كُنَّ فِيهِ كَانَ مُنَافِقًا  
خَالِصًا، وَمَنْ كَانَتْ فِيهِ خَصْلَةٌ مِنْهُنَّ كَانَتْ فِيهِ خَصْلَةٌ مِنَ النِّفَاقِ حَتَّى يَدْعَهَا إِذَا أُؤْتِمِنَ خَانَ  
وَإِذَا حَدَّثَ كَذَبَ وَإِذَا عَاهَدَ غَدَرَ، وَإِذَا خَاصَمَ فَجَرَ)). تَابَعَهُ شُعْبَةُ عَنِ الْأَعْمَشِ.

[طرفاه 2459، 3178، تحفة 8931].

---

<sup>25</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 32, Saxiix

<sup>26</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 33, Saxiix

34. Cabdullahi Bin Camr Allaha ka raali noqdee wuxuu ka waryay Nabiga ﷺ inuu yiri: Afar qofkii ay ku jiraan waa munaafaq aanan shaki ku jirin, qofkii ay qeeb afartaas kamida ku lagu arkana qeeb munaafaqnimo ah ayaa ku jirta ilaa uu iska daayo, munaafaqa haddii la aamino qiyaano ayuu sameeya, haddii uu sheekeynaayo been ayuu sheega, haddii uu balan qaadana wuu jabiya balanta, haddii uu qof la doodana wuu dambaaba.<sup>27</sup>

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: ((مَنْ يَقُمْ لَيْلَةَ الْقَدْرِ إِيمَانًا وَاحْتِسَابًا غُفِرَ لَهُ مَا تَقَدَّمَ مِنْ ذَنْبِهِ)).

[أطرافه 37، 38، 1901، 2008، 2009، 2014، تحفة 13730].

35. Abii Hureyra Allaha ka raali noqdee wuxuu yiri: Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri: qofkii u istaago salaad habeenka leylatul Qadarka asagoo rumeysan iney xaq tahay, dambi dhaafna Alle ﷻ ka dalbanaayo waalo dhaafa dambigiisa uu horey usoo sameeyay.<sup>28</sup>

أَبَا هُرَيْرَةَ عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: ((انْتَدَبَ اللَّهُ لِمَنْ خَرَجَ فِي سَبِيلِهِ لَا يُخْرِجُهُ إِلَّا إِيمَانًا بِي وَتَصَدِيقًا بِرُسُلِي أَنْ أُرْجَعَهُ بِمَا نَالَ مِنْ أَجْرٍ أَوْ غَنِيمَةٍ، أَوْ أَدْخَلَهُ الْجَنَّةَ، وَلَوْلَا أَنْ أَشُقَّ عَلَيَّ مَا قَعَدْتُ خَلْفَ سَرِيَّةٍ، وَلَوْ دِدْتُ أَنِّي أُقْتَلُ فِي سَبِيلِ اللَّهِ ثُمَّ أَحْيَا، ثُمَّ أُقْتَلُ ثُمَّ أَحْيَا، ثُمَّ أُقْتَلُ)).

---

<sup>27</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 34, Saxiix

<sup>28</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 35, Saxiix

[أطرافه 2787، 2797، 2972، 3123، 7226، 7227، 7457، 7463، تحفة 14901،  
14901 أ- 1 / 16].

36. Abaa Hureyra Allaha ka raali noqdee wuxuu ka waryay Nabiga ﷺ inuu yiri: Allah ﷻ wuxuu yiri: aniga kafaalo qaaday qofkii u baxo inuu wadadiisa qaado, jihaado, kaliya asagoo u baxay inuu i rumeeyay, Rasuulkeygana ﷺ rumeeyay, inaan soo celinaayo asagoo helay ajar iyo qaniimo, ama haduu ku dhinto wadadaas wanaaga ah uu baxayna Janno aan geeyo, Nabiga ﷺ wuxuu yiri: haddaan u baqaanin umadeyda maanan fadhiisteen, ee waxaan jeclaan lahaa in jihaadka leygu dilo, kadib leyso nooleeyo hadana ley dilo kadibna leyso nooleeyo, kadibna ley dilo.<sup>29</sup>

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: ((مَنْ قَامَ رَمَضَانَ إِيمَانًا وَاحْتِسَابًا غُفِرَ لَهُ مَا تَقَدَّمَ مِنْ ذَنْبِهِ)).

[أطرافه 35، 38، 1901، 2008، 2009، 2014، تحفة 12277].

37. Abii Hureyra Allaha ka raali noqdee wuxuu ka waryay Rasuulkii Alle ﷺ inuu yiri: qofkii istaago habeenka Ramadaanka asagoo rumeysan Alle ﷻ dambi dhaafna ka rajeynaayo waalo dhaafa dambigiisi hore.<sup>30</sup>

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: ((مَنْ صَامَ رَمَضَانَ إِيمَانًا وَاحْتِسَابًا غُفِرَ لَهُ مَا تَقَدَّمَ مِنْ ذَنْبِهِ)).

[أطرافه 35، 37، 1901، 2008، 2009، 2014، تحفة 15353].

---

<sup>29</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 36, Saxiix

<sup>30</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 37, Saxiix

38. Abii Hureyra Allaha ka raali noqdee wuxuu yiri: Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri: qofkii sooma bisha Ramadaanka asagoo rumeysan Alle ﷻ dambi dhaafna ka rajeynaayo waalo dhaafa dambigii uu hore u galay.<sup>31</sup>

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: ((إِنَّ الدِّينَ يُسْرٌ، وَلَنْ يُشَادَّ الدِّينَ أَحَدٌ إِلَّا غَلَبَهُ، فَسَدِّدُوا وَقَارِبُوا وَأَبْشِرُوا، وَاسْتَعِينُوا بِالْغَدْوَةِ وَالرَّوْحَةِ وَشَيْءٍ مِنَ الدُّلْجَةِ)).  
[أطرافه 5673، 6463، 7235، تحفة 13069].

39. Abii Hureyra Allaha ka raali noqdee wuxuu yiri: Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri: diintaan islamka way fududahay, axadkiina hadduu diinta Alle ﷻ isku dayo inuu ku wada dhaqmana way ka guuleysataa, toosnaada, soo dhawaada, bishaareysta, kaalmeysta kalahaada aad cibaadada iyo camalka u kalaheysaan, iyo markaad kasoo laabataan shaqada cibaadeysta, ilaa habeenkiina waqtiyadiisa cibaado kaashada.<sup>32</sup>

عَنِ الْبَرَاءِ أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ كَانَ أَوَّلَ مَا قَدِمَ الْمَدِينَةَ نَزَلَ عَلَى أَجْدَادِهِ - أَوْ قَالَ أَخْوَالِهِ - مِنَ الْأَنْصَارِ، وَأَنَّهُ صَلَّى قَبْلَ بَيْتِ الْمَقْدِسِ سِتَّةَ عَشَرَ شَهْرًا، أَوْ سَبْعَةَ عَشَرَ شَهْرًا، وَكَانَ يُعْجِبُهُ أَنْ تَكُونَ قِبْلَتُهُ قِبَلَ الْبَيْتِ، وَأَنَّهُ صَلَّى أَوَّلَ صَلَاةٍ صَلَّاهَا صَلَاةَ الْعَصْرِ، وَصَلَّى مَعَهُ قَوْمٌ، فَخَرَجَ رَجُلٌ مِمَّنْ صَلَّى مَعَهُ، فَمَرَّ عَلَى أَهْلِ مَسْجِدٍ، وَهُمْ رَاكِعُونَ فَقَالَ أَشْهَدُ بِاللَّهِ لَقَدْ صَلَّيْتُ مَعَ رَسُولِ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قِبَلَ مَكَّةَ، فَدَارُوا كَمَا هُمْ قِبَلَ الْبَيْتِ، وَكَانَتْ الْيَهُودُ قَدْ أَعْجَبَهُمْ إِذْ كَانَ يُصَلِّي قِبَلَ بَيْتِ الْمَقْدِسِ، وَأَهْلُ الْكِتَابِ، فَلَمَّا وَلَّى وَجْهَهُ قِبَلَ الْبَيْتِ أَنْكَرُوا ذَلِكَ.

<sup>31</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 38, Saxiix

<sup>32</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 39, Saxiix

[أطرافه 399، 4486، 4492، 7252، تحفة 1840-1/17].

40. Baraa' Bin Caazib Allaha ka raali noqdee wuxuu waryay in Nabiga ﷺ uu ahaay qofkii ugu horeeyay ee yimaaday wuxuuna kusoo dagay awoowyaashiis ama wuxuuba yiri: abtiyaashiis heer banii najaar kana mid ahaan Ansaartii, wuxuuna dhinaca Beyt Al-Maqdis u dukanaaye lix iyo toban bilood, ama todobo iyo toban bilood, wuxuuna jeclaa in qiblada ay u noqoto dhinaca Makka, salaadii uu dukanaayay Nabiga ﷺ waxay ahayd salaada Casirka, waxaana la duktay qoom, waxaana soo baxay nin kamida ragii la dugtay, wuxuuna soo maray qoom masjid ku dukanaayay, ayagoo rukuucsan wuxuuna yiri: Ilaah ﷻ baan ku dhaartaye waxaan la duktay Rasuulkii Alle ﷺ waxaana u dukanay dhinaca Makka, wayna jeesteen ayagoo sidoosda u rukuucsan dhinaca Makka, Yahuudana waxay ahaayeen kuwa jecleystay Nabiga ﷺ madaama uu u dukanaayay dhanka Beyt Al-Maqdis, iyo kuwa Ahlu Kitaabka ah, markuu Nabiga ﷺ uu wajigiisa u jeediyay dhanka kacbada arintaasi darteed ayay Rasuulnimadiisa u inkireen.<sup>33</sup>

أَبَا سَعِيدِ الْخُدْرِيِّ أَخْبَرَهُ أَنَّهُ سَمِعَ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَقُولُ: ((إِذَا أَسْلَمَ الْعَبْدُ فَحَسَنَ إِسْلَامُهُ يُكْفِرُ اللَّهُ عَنْهُ كُلَّ سَيِّئَةٍ كَانَ زَلَفَهَا، وَكَانَ بَعْدَ ذَلِكَ الْقِصَاصُ، الْحَسَنَةُ بِعَشْرِ أَمْثَالِهَا إِلَى سَبْعِمِائَةٍ ضِعْفٍ، وَالسَّيِّئَةُ بِمِثْلِهَا إِلَّا أَنْ يَتَجَاوَزَ اللَّهُ عَنْهَا)).

[تحفة 4175].

41. Abaa Saciid Al-Qudrii wuxuu sheegay in uu maqlay Rasuulkii Alle ﷺ oo leh: haddii uu adoonka soo islaamo ayna hagaagsanaato islamnimadiisa Alle ﷻ wuu u dhaafa dambiyadii uu hore u galay, kadibna waxaa intaas kadib

---

<sup>33</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 40, Saxiix

muteysan doona qisaas haduu dambi kale galo, halkii xasano waxay lamid tahay toban xasano waana lasii laalaabayaa ilaa todobo boqol oo jeer, xumaantaana sidoo kale hal xumaan ayay la mid tahay ilaa uu Alle ﷺ iska dhaafo mooye.<sup>34</sup>

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: ((إِذَا أَحْسَنَ أَحَدُكُمْ إِسْلَامَهُ، فَكُلُّ حَسَنَةٍ يَعْمَلُهَا تُكْتَبُ لَهُ بِعَشْرِ أَمْثَالِهَا إِلَى سَبْعِمِائَةِ ضِعْفٍ، وَكُلُّ سَيِّئَةٍ يَعْمَلُهَا تُكْتَبُ لَهُ بِمِثْلِهَا)).

[تحفة 14714].

42. Abii Hureyra Allaha ka raali noqdee wuxuu yiri: Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri: haddii axadkiina islamnimadiisu wanaagsanaato, wanaag walbo uu sameeyo waxaa loo qoraa towban ajar waxaana loo sii jibaara todobo boqol oo jeer, xumaan walboo uu sameeyana waxaa loo qoraa mid lamida.<sup>35</sup>

عَنْ عَائِشَةَ أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ دَخَلَ عَلَيْهَا وَعِنْدَهَا امْرَأَةٌ قَالَ: ((مَنْ هَذِهِ)). قَالَتْ: فُلَانَةٌ. تَذَكَّرُ مِنْ صَلَاتِهَا. قَالَ: ((مَهْ، عَلَيْكُمْ بِمَا تُطِيقُونَ، فَوَاللَّهِ لَا يَمَلُّ اللَّهُ حَتَّى تَمَلُّوا)). وَكَانَ أَحَبَّ الدِّينِ إِلَيْهِ مَا دَامَ عَلَيْهِ صَاحِبُهُ.

[طرفه 1151، تحفة 17307].

43. Caa'isha Allaha ka raali noqdee waxaa u soo galay Nabiga ﷺ waxaana la joogtay haweeney wuxuuna yiri: waa tuma midaan kula joogto? Caa'isha Allaha ka raali noqdee waxay tiri: waa heblaayo, salaadaheeda ayay igaga sheekeyneesa, wuxuu yiri: ka joogso ha sheegin cibaadadaada, la imaada

---

<sup>34</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 41, Saxiix

<sup>35</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 42, Saxiix

cibaadada inta aad kartaan, Allah ﷻ baan ku dhaaftaye Alle ﷻ ma daalaayo ilaa inta aad ka daaleysaan, wuxuuna ugu jeclaa Nabiga ﷺ diinta midkiina daai'imo camalka uu karaayo.<sup>36</sup>

عَنْ أَنَسٍ عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: ((يَخْرُجُ مِنَ النَّارِ مَنْ قَالَ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ، وَفِي قَلْبِهِ وَزَنْ شَعِيرَةٍ مِنْ خَيْرٍ، وَيَخْرُجُ مِنَ النَّارِ مَنْ قَالَ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ، وَفِي قَلْبِهِ وَزَنْ بُرَّةٍ مِنْ خَيْرٍ، وَيَخْرُجُ مِنَ النَّارِ مَنْ قَالَ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ، وَفِي قَلْبِهِ وَزَنْ ذَرَّةٍ مِنْ خَيْرٍ)). قَالَ أَبُو عَبْدِ اللَّهِ قَالَ أَبَانُ حَدَّثَنَا قَتَادَةُ حَدَّثَنَا أَنَسٌ عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: ((مَنْ إِيْمَانٍ)). ((مَنْ خَيْرٍ)).

[أطرافه 4476، 6565، 7410، 7440، 7509، 7510، 7516، تحفة 1356، 1134-1/18].

44. Anas wuxuu ka waryay Nabiga ﷺ inuu yiri: naarta wuu kasoo baxaayay qof yiri: Ilaah mooye Ilaah kale ma jiro, qalbigiisuna ay ku jirtay wax la eg inyar oo qamadi oo qeyr ah, naarta wuu kasoo baxaaya qofkii yiraahdo: Ilaah mooye Ilaah kale ma jiro, qalbigiisuna uu ku jiro in yar oo la eg bur oo qeyr ah, naarta wuu kasoo baxaaya qof yiri: Ilaah mooye Ilaah kale ma jiro, qalbigiisuna uu ku jiro in yar oo dhuuro caso ah oo qeyr ah.<sup>37</sup>

عَنْ عُمَرَ بْنِ الْخَطَّابِ أَنَّ رَجُلًا مِنَ الْيَهُودِ قَالَ لَهُ يَا أَمِيرَ الْمُؤْمِنِينَ، آيَةٌ فِي كِتَابِكُمْ تَقْرَأُونَهَا لَوْ عَلَيْنَا مَعْشَرَ الْيَهُودِ نَزَلَتْ لَاتَّخَذْنَا ذَلِكَ الْيَوْمَ عِيدًا. قَالَ أَيُّ آيَةٍ قَالَ: ﴿الْيَوْمَ أَكْمَلْتُ لَكُمْ دِينَكُمْ

وَأَتَمَمْتُ عَلَيْكُمْ نِعْمَتِي وَرَضِيْتُ لَكُمُ الْإِسْلَامَ دِينًا﴾ [سورة المائدة]

قَالَ عُمَرُ قَدْ عَرَفْنَا ذَلِكَ الْيَوْمَ وَالْمَكَانَ الَّذِي نَزَلَتْ فِيهِ عَلَى النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ وَهُوَ قَائِمٌ بِعَرَفَةَ يَوْمَ جُمُعَةٍ.

<sup>36</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 43, Saxiix

<sup>37</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 44, Saxiix

[أطرافه 4407، 4606، 7268، تحفة 10468].

45. Cumar Allaha ka raali noqdee waxaa laga waryay in nin Yahuudi ahaa uu cumar ku yiri: amiirkii Mu' miniintoow, aayad kitaabkiina ku jirto oo aad aqrisaan haddi anagoo Yahuuda ah ay naguso dagan lahayd maalinta ay soo dagatay ciid ayaan ka dhigan lahayn. Wuxuu yiri Cumar: Aayadee? Ninkii Yahuudiga ahaa wuxuu aqriyay Aayada kor ku xusan, kadibna Cumar wuxuu yiri: waxaan garaneena maalintaas iyo meeshii ay kusoo dagatay Nabiga ﷺ asaga oo taagan carafa maalinta Jimcaha.<sup>38</sup>

طَلْحَةَ بْنِ عُبَيْدِ اللَّهِ يَقُولُ: جَاءَ رَجُلٌ إِلَى رَسُولِ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ مِنْ أَهْلِ نَجْدٍ، ثَائِرُ الرَّأْسِ، يُسْمَعُ دَوِيَّ صَوْتِهِ، وَلَا يُفْقَهُ مَا يَقُولُ حَتَّى دَنَا، فَإِذَا هُوَ يَسْأَلُ عَنِ الْإِسْلَامِ فَقَالَ رَسُولُ اللَّهِ - صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: ((خَمْسُ صَلَوَاتٍ فِي الْيَوْمِ وَاللَّيْلَةِ)). فَقَالَ هَلْ عَلَيَّ غَيْرُهَا قَالَ: ((لَا، إِلَّا أَنْ تَطَوَّعَ)). قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: ((وَصِيَامُ رَمَضَانَ)). قَالَ هَلْ عَلَيَّ غَيْرُهُ قَالَ: ((لَا، إِلَّا أَنْ تَطَوَّعَ)). قَالَ وَذَكَرَ لَهُ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ الرِّكَاتَةَ. قَالَ هَلْ عَلَيَّ غَيْرُهَا قَالَ: ((لَا، إِلَّا أَنْ تَطَوَّعَ)). قَالَ فَأَدْبَرَ الرَّجُلُ وَهُوَ يَقُولُ وَاللَّهِ لَا أَزِيدُ عَلَى هَذَا وَلَا أَنْقُصُ. قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: ((أَفْلَحَ إِنْ صَدَقَ)).

[أطرافه 1891، 2678، 6956، تحفة 5009].

46. Dalxa Bin Cubeydilaahi wuxuu yiri: nin ayaa u yimid Rasuulkii Alle ﷺ oo heer ahlu Najd ah, timihiisuna taataaganyihiin, codkiisuna si hoose loo maqlaayo, mana la fahmeynin waxa uu dhahaaye ilaa uuso dhawaaday, markaas ayuu su'aalay Rasuulkii Alle ﷺ wax ku saabsan Islamka, Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri: waa shanta salaadood in la dukado habeenkii iyo

<sup>38</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 45, Saxiix

maalintii, wuxuu yiri ninkii wax aanan ayaga ahayn maleygu leeyahay, markaas ayuu yiri: maya ilaa aad sunno kala timaado, Rasuulkii Alle wuxuu yiri: in bisha soon la soomo, wuxuu yiri ninkii wax aanan ayaga ahayn maleygu leeyahay, markaas ayuu yiri: maya ilaa aad sunno kala timaado, wuxuu yiri: in zakada la bixiyo, wuxuu yiri ninkii wax aanan ayaga ahayn maleygu leeyahay, markaas ayuu yiri: maya ilaa aad sunno kala timaado, Markaasuu ninkii sii jeestay asagoo dhahaayo walahi waxna kuma ziyaadinaayo waxna kama nusqaaminaayo, Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri: wuu liibaanay hadduu run sheego.<sup>39</sup>

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: ((مَنْ اتَّبَعَ جَنَازَةَ مُسْلِمٍ إِيْمَانًا وَاحْتِسَابًا، وَكَانَ مَعَهُ حَتَّى يُصَلَّى عَلَيْهَا، وَيَفْرُغَ مِنْ دَفْنِهَا، فَإِنَّهُ يَرْجِعُ مِنَ الْأَجْرِ بِقِيرَاطَيْنِ، كُلُّ قِيرَاطٍ مِثْلُ أُحُدٍ، وَمَنْ صَلَّى عَلَيْهَا ثُمَّ رَجَعَ قَبْلَ أَنْ تُدْفَنَ فَإِنَّهُ يَرْجِعُ بِقِيرَاطٍ)). تَابَعَهُ عَثْمَانُ الْمُؤَدَّبُ قَالَ: حَدَّثَنَا عَوْفٌ عَنْ مُحَمَّدٍ عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ نَحْوَهُ.

[طرفاه 1323، 1325، تحفة 12244، 14481-1/19].

47. Abii Hureyra Allaha ka raali noqdee wuxuu waryay in Rasuulkii Alle ﷺ uu yiri: qofkii raaco janaaso muslim asagoo rumeysan Alle ﷻ rajeynaayo ajar iyo dambi dhaaf, haddana ahaaday mid la jiro ilaa uu lagu dukto janaasada, hadana lasoo joogo ilaa laga duugo, wuxuu qofkaasi lasoo laabanaayo labo qiiraad oo ajar ah, halkii ajarna uu lamid yahay sida buurta uxud oo kale, qofkii ku dukado janaasada hadana kasoo laabto kahor inta aanan la duugin wuxuu lasoo laabanaaya hal qiiraad oo ajar ah.<sup>40</sup>

---

<sup>39</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 46, Saxiix

<sup>40</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 47, Saxiix

عَبْدُ اللَّهِ أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: ((سِبَابُ الْمُسْلِمِ فُسُوقٌ، وَقِتَالُهُ كُفْرٌ)).  
[طرفاه 6044، 7076، تحفة 9243].

48. Cabdullaahi wuxuuka waryay Nabiga ﷺ inuu yiri: caayida qofka Muslimka ah waa faasiqnimo dilkiisana waa gaalnimo.<sup>41</sup>

عِبَادَةُ بِنِ الصَّامِتِ أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ خَرَجَ يُخْبِرُ بَلِيْلَةَ الْقَدْرِ، فَتَلَّاحَى رَجُلَانِ مِنَ الْمُسْلِمِينَ فَقَالَ: ((إِنِّي خَرَجْتُ لِأُخْبِرْكُمْ بَلِيْلَةَ الْقَدْرِ، وَإِنَّهُ تَلَّاحَى فُلَانٌ وَفُلَانٌ فَرُفِعَتْ وَعَسَى أَنْ يَكُونَ خَيْرًا لَكُمْ التَّمَسُّوْهَا فِي السَّبْعِ وَالْتِسْعِ وَالْخَمْسِ)).  
[طرفاه 2023، 6049، تحفة 5071].

49. Cubaada Bin Al-Saamit Allaha ka raali noqdee wuxuu ka waryay Rasuulkii Alle ﷺ inuu usoo baxay in uu asxaabtiisa u sheego habeenka Leylatul Qadarka, kadibna laba nin oo asxaabtiisa kamida ayaa murmeen intuu labada nin ku mashquulsanaa ayuu hilmaamay wuxuuna yiri: waxaan u soo baxay inaan nii sheego habeenka Leylatul Qadarka, kadibna hebel iyo hebel ayaa murmeen intaan labada nin ku mashquulsanaa ayaan hilmaamay, waxaana laga yaaba iney sidaasi qeyr idin tahay lakiin habeenkaas ka raadiya todobo iyo labaatanka, sagaal iyo labaatanka ama shan iyo labaatanka.<sup>42</sup>

عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ قَالَ: كَانَ النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ بَارِزًا يَوْمًا لِلنَّاسِ، فَأَتَاهُ جَبْرِيلُ فَقَالَ مَا الْإِيمَانُ قَالَ: ((الْإِيمَانُ أَنْ تُؤْمِنَ بِاللَّهِ وَمَلَائِكَتِهِ وَبِلِقَائِهِ وَرُسُلِهِ، وَتُؤْمِنَ بِالْبَعْثِ)). قَالَ مَا الْإِسْلَامُ قَالَ: ((الْإِسْلَامُ أَنْ تَعْبُدَ اللَّهَ وَلَا تُشْرِكَ بِهِ، وَتَقِيمَ الصَّلَاةَ، وَتُؤَدِّيَ الزَّكَاةَ الْمَفْرُوضَةَ، وَتَصُومَ رَمَضَانَ)). قَالَ مَا الْإِحْسَانُ قَالَ: ((أَنْ تَعْبُدَ اللَّهَ كَأَنَّكَ تَرَاهُ، فَإِنْ لَمْ تَكُنْ تَرَاهُ فَإِنَّهُ

---

<sup>41</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 48, Saxiix

<sup>42</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 49, Saxiix

يَرَاكَ)). قَالَ مَتَى السَّاعَةُ قَالَ: ((مَا الْمَسْئُولُ عَنْهَا بِأَعْلَمَ مِنَ السَّائِلِ، وَسَأُخْبِرُكَ عَنْ أَشْرَاطِهَا إِذَا وُلِدَتِ الْأُمَّةُ رَبَّهَا، وَإِذَا تَطَاوَلَ رُغَاةُ الْإِبِلِ الْبُهْمُ فِي الْبُنْيَانِ، فِي حَمْسٍ لَا يَعْلَمُهُنَّ إِلَّا اللَّهُ)).  
ثُمَّ تَلَا النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: ﴿إِنَّ اللَّهَ عِنْدَهُ عِلْمُ السَّاعَةِ﴾ (سورة القمان) [الآية]. ثُمَّ  
أَدْبَرَ فَقَالَ: ((رُدُّوهُ)). فَلَمْ يَرَوْا شَيْئًا. فَقَالَ: ((هَذَا جِبْرِيلُ جَاءَ يُعَلِّمُ النَّاسَ دِينَهُمْ)). قَالَ أَبُو  
عَبْدِ اللَّهِ جَعَلَ ذَلِكَ كَلِّهُ مِنَ الْإِيمَانِ.  
[طرفه 4777، تحفة 14929-1/20].

50. Abii Hureyra Allaha ka raali noqdee wuxuu yiri: wuxuu ahaa Nabiga ﷺ maalin mid ka dhax muuqday dadka, Jibriil Aleyhi Salam baa u yimid wuxuuna yiri: waa maxay Iimaanka? Wuxuuna yiri: Iimaanka waa inaad Alle ﷻ rumeysaa, Malaa'igtiisa rumeysaa, lakulankiisa rumeysaa, Rusushiisa rumeysaa, iyo maalinta leysa soo saari doono, hadana wuxuu yiri: waa maxay Islam? Wuxuuna yiri: Islamka waa inaad caabuda Alle ﷻ oo aadan cibaadadiisa cid kale la wadaajinin, waa inaad salaada oogtaa, waa inaad zakada la timaada ee faradka ah, waa inaad bisha Ramadaanka soonta, wuxuu yiri: waa maxay ixsaan? Wuxuu yiri: waa inaad Ilaahey ﷻ caabuda sida adigoo arkaayo oo kale hadaadan adiga arkeenin asaga ayaa ku arkaayo, wuxuu yiri: waa goorme saacada qiyaame? Wuxuu yiri: kaagama warrooni, waxaase kuu sheegi doona calaamadaheeda waxaana kamida: iney dhasho adoonta sayidkeeda, iyo kuwii geela jirka ahaa heer baadiyaha ahaana ku tartamaan daaro dhaadheer, waxaana jirto shan cid aanan Alle ﷻ ahayna ma oga wuxuuna aqriyay aayada macnaheeda yahay:

Ilaahey ﷻ waxaa agtiisa ah cilmiga saacada qiyaame

Roobkana asagaa keeno

Wuxuuna ogyahay waxa ku jiro riximaka hooyada

Mana oga nafsada berito waxa ay kasban doonto

Iyo meesha ay ku dhimaneyso.<sup>43</sup>

Kadibna malagii waa uu baxay, Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri: soo celiya, kadibna asxaabtii waxba maysan arkin, wuxuuna ku yiri: kaasi wuxuu ahaa jibriil wuxuuna idin kugu yimid inuu diintiina idin baro.<sup>44</sup>

عَبَّاسٍ أَخْبَرَهُ قَالَ: أَخْبَرَنِي أَبُو سُفْيَانَ أَنَّ هِرْقَلَ قَالَ لَهُ سَأَلْتُكَ هَلْ يَزِيدُونَ أُمَّ يَنْقُصُونَ، فَزَعَمْتَ أَنَّهُمْ يَزِيدُونَ، وَكَذَلِكَ الْإِيمَانُ حَتَّى يَتِمَّ. وَسَأَلْتُكَ هَلْ يَرْتَدُّ أَحَدٌ سَخَطَةً لِدِينِهِ بَعْدَ أَنْ يَدْخُلَ فِيهِ، فَزَعَمْتَ أَنْ لَا، وَكَذَلِكَ الْإِيمَانُ حِينَ تَخَالِطُ بِشَاشَتِهِ الْقُلُوبَ، لَا يَسْخَطُهُ أَحَدٌ. [أطرافه 7، 2681، 2804، 2941، 2978، 3174، 4553، 5980، 6260، 7196، 7541، تحفة 4850].

51. Cabaas wuxuu yiri: Abuu Sufyaan wuxuu iisheegay in Hiriqla uu yiri: waxaan ku su'aalay: ma ziyaadooyan dadkaas rumeeyay Nabiga ﷺ mase way nusqaamoyan? Waxaan iri: way ziyaadooyan, waa sidaas Iimaanka ilaa uu dhameystirmo, waxaan ku su'aalay: Maka ridooway axadkooda caro uu diinta ka carooday markii ay soo galaan kadib waxaan iri: maya kama ridoobaan, Iimaankana waa sidaaso markii ay ku dhax milmo quluubta macaankiisa<sup>45</sup>

---

<sup>43</sup> Surah Al-Luqman, Ayah 24

<sup>44</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 50, Saxiix

<sup>45</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 51, Saxiix

عَنْ عَامِرٍ قَالَ: سَمِعْتُ التُّعْمَانَ بْنَ بَشِيرٍ يَقُولُ: سَمِعْتُ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَقُولُ: ((الْحَلَالُ بَيْنُ وَالْحَرَامِ بَيْنٌ، وَبَيْنَهُمَا مُشَبَّهَاتٌ لَا يَعْلَمُهَا كَثِيرٌ مِنَ النَّاسِ، فَمَنْ اتَّقَى الْمُشَبَّهَاتِ اسْتَبْرَأَ لِدِينِهِ وَعِرْضِهِ، وَمَنْ وَقَعَ فِي الشُّبُهَاتِ كَرَعَ حَوْلَ الْحِمَى، يُوشِكُ أَنْ يُوَاقِعَهُ. أَلَا وَإِنَّ لِكُلِّ مَلِكٍ حِمَى، أَلَا إِنَّ حِمَى اللَّهِ فِي أَرْضِهِ مَحَارِمُهُ، أَلَا وَإِنَّ فِي الْجَسَدِ مُضْغَةً إِذَا صَلَحَتْ صَلَحَ الْجَسَدُ كُلُّهُ، وَإِذَا فَسَدَتْ فَسَدَ الْجَسَدُ كُلُّهُ. أَلَا وَهِيَ الْقَلْبُ)).

52. Caamir wuxuu yiri: waxaan maqlay Nucmaan Bin Bashiir oo leh: waxaan maqlay Rasuulkii Alle ﷺ oo leh: xalaasha way cadahay xaarantana way cadahay, dhaxdooduna waxaa ah shubuhaad aysan dadka intooda badan ogeyn, qofkii ka baqo shubuhaadka wuxuu bari yeelay diintiisa iyo sharaftiisa, qofkii ku dhaco shubuhaadkaas wuxuu ku dhacay xaaran sida kii ari raaca ahaa arigiisa ku raacaayay seeri dad leeyihiin agteeda kana baqay arigiisa iney seeridaas ama soohdintaasi galaan, boqor walbo wuxuu leeyahay seeri u gaar ah, Ilaaheynta seeridiisa waa wuxuu xarimay, jirkana waxaa ku jiro cad hilib ah cadkaas hadduu wanaagsanaado jirka intiisa kalena wuu wanaagsanan haddiise uu xumaado jirka intiisa kale ayaa xumaan cadkaasna waa qalbiga.<sup>46</sup>

ابْنِ عَبَّاسٍ، قَالَ إِنَّ وَفَدَ عَبْدَ الْقَيْسِ لَمَّا أَتَوْا النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: ((مَنْ الْقَوْمُ أَوْ مَنْ الْوَفْدُ)). قَالُوا رَيْبَعَةٌ. قَالَ: ((مَرْحَبًا بِالْقَوْمِ - أَوْ بِالْوَفْدِ - غَيْرَ خَزَايَا وَلَا نَدَامَى)). فَقَالُوا يَا رَسُولَ اللَّهِ، إِنَّا لَا نَسْتَطِيعُ أَنْ نَأْتِيكَ إِلَّا فِي شَهْرِ الْحَرَامِ، وَبَيْنَنَا وَبَيْنَكَ هَذَا الْحَيُّ مِنْ كُفَّارٍ مُضَرٍّ، فَمَرْنَا بِأَمْرِ فَضْلِ، نُخْبِرُ بِهِ مَنْ وَرَاءَنَا، وَنَدْخُلُ بِهِ الْجَنَّةَ. وَسَأَلُوهُ عَنِ الْأَشْرِبَةِ. فَأَمَرَهُمْ بِأَرْبَعٍ، وَنَهَاهُمْ عَنْ أَرْبَعٍ، أَمَرَهُمْ بِالْإِيمَانِ بِاللَّهِ وَحْدَهُ. قَالَ: ((أَتَدْرُونَ مَا الْإِيمَانُ بِاللَّهِ وَحْدَهُ)). قَالُوا اللَّهُ وَرَسُولُهُ أَعْلَمُ. قَالَ: ((شَهَادَةٌ أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ وَأَنَّ مُحَمَّدًا رَسُولُ اللَّهِ، وَإِقَامُ الصَّلَاةِ،

<sup>46</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 52, Saxiix

وَإِيتَاءُ الزَّكَاةِ، وَصِيَامُ رَمَضَانَ، وَأَنْ تُعْطُوا مِنَ الْمَغْنَمِ الْخُمْسَ)). وَنَهَاهُمْ عَنْ أَرْبَعٍ عَنِ الْحَنْتَمِ  
وَالدُّبَاءِ وَالنَّقِيرِ وَالْمُرَقَّتِ. وَرَبَّهَا قَالَ الْمُقَيَّرِ.  
وَقَالَ: ((احْفَظُوهُنَّ وَأَخْبِرُوا بِهِنَّ مَنْ وَرَاءَكُمْ)).

[أطرافه 87، 523، 1398، 3095، 3510، 4368، 4369، 6176، 7266، 7556، تحفة  
6524-1/21].

53. Ibnu Cabaas wuxuu yiri: wafdi uu hogaaminaaye Cabdulqays markii ay u yimaadeen Nabiga ﷺ wuxuu yiri: waa kuma wafdiga ama qoomkaan? Waxay yiraahdeen waa wafdi ka socdo qabiilka Rabiica, wuxuuna ku yiri: soo dhawaada qoomka ama wafdigaan yimid, ayadoon jirin shalaay ama meel aad duli ka dareemeyn, kadib waxay yiraahdeen qoomkii Rasuulkii Allow ﷺ anaga ma awoodno inaan kuu nimaano bisha shahrul Xaramka mooye , anaga iyo adigana dhaxdeena waxaa dagan qaar gaalada kamida qabiilka Mudar la yiraahdo, ee nafar wax cad oo aan ku dhaqano, oo aan u sheegno kuwa ehelkeena ah, oo aan Janno ku tageyno, kadib Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu amray afar shay wuxuuna ka reebay afar shay, in Ilaahey kaligiisa caabudaan, kadibna wuxuu yiri: magaraneesaan waa maxay Iimaan? Waxayna yiraahdeen Allah ﷻ iyo Rasuulkiisa ﷺ ayaa og, Rasuulkii Alle ﷺ wuxuu yiri: in la qiro Ilaah mooye Alle kale inuusan jirin Muxammedna Rasuulkii Alle ﷺ inuu yahay, salaada in la oogo, zakada la bixiyo, bisha Ramadaan in la soomo, iyo in ganiimada laga bixiyo Qumus, wuxuu ka reebay weelasha wax lagu cabo qaarkood ineysan cabitaanadooda ku shubanin sida: Xantamka, Dubaa'a, Naqiirka, iyo Muqayarka waa weelasha laga reebay magacyadooda, wuxuuna yiri: xafida una sheega kuwa ehelkiina ah.<sup>47</sup>

---

<sup>47</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 53, Saxiix

عن عُمَرَ بْنِ الْخَطَّابِ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ عَلَى الْمِنْبَرِ قَالَ: سَمِعْتُ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَقُولُ: إِنَّمَا الْأَعْمَالُ بِالنِّيَّاتِ، وَإِنَّمَا لِكُلِّ امْرِئٍ مَا نَوَى، فَمَنْ كَانَتْ هِجْرَتُهُ إِلَى دُنْيَا يُصِيبُهَا أَوْ إِلَى امْرَأَةٍ يَنْكِحُهَا فَهِجْرَتُهُ إِلَى مَا هَاجَرَ إِلَيْهِ. صحيح البخاري [صحيح] [أطرافه 1، 2529، 3898، 5070، 6689، 6953، تحفة 10612].

54. Abii Xafsa Cumar Bin Khataab Allaha ka raali noqde wuxuu yiri: waxaan maqlay Rasuulkii Alle ﷺ oo leh: camalada oo idil waxay kasoo fulaan qalbiga, qof walbana wuxuu leeyahay wixii uu niyeysto, qofkii ay hijradiisu ahaato aduunyo inuu helo ama uu guursado haweeney uu doonayay hijradiisa waxay ahaaneysaa wixii uu u hijrooda oo Alle agtiisa waxba kuma lahan. <sup>48</sup>

عَنْ أَبِي مَسْعُودٍ عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: ((إِذَا أَنْفَقَ الرَّجُلُ عَلَى أَهْلِهِ يَحْتَسِبُهَا فَهُوَ لَهُ صَدَقَةٌ

55. Ibnu Mascuud Allaha ka raali noqdee wuxuu ka waryay Rasuulkii Alle ﷺ inuu yiri: haddii qofka oo ehelkiisa uu siiyo cuno ama cabitaan asagoo u niyeysanaayo Alle ﷻ dartiisa sadaqo ayay u noqoneesa. <sup>49</sup>

عَنْ سَعْدِ بْنِ أَبِي وَقَّاصٍ أَنَّهُ أَخْبَرَهُ أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: ((إِنَّكَ لَنْ تُنْفِقَ نَفَقَةً تَبْتَغِي بِهَا وَجْهَ اللَّهِ إِلَّا أُجِرْتَ عَلَيْهَا، حَتَّى مَا تَجْعَلُ فِي فِي امْرَأَتِكَ)).

[أطرافه 1295، 2742، 2744، 3936، 4409، 5354، 5659، 5668، 6373، 6733، تحفة 3890].

<sup>48</sup> Saxiix Al-Bukhaari, xadiithka 54, Saxiix.

<sup>49</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 55, Saxiix

56. Sacad Bin Abii Waqaas Allaha ka raali noqdee wuxuu ku sheegay in Rasuulkii Alle ﷺ uu yiri: haddii aad ehelkaada cuno ama cabitaan siisid adigoo Alle ﷻ wajigiisa kaliya doonaayo ajirkeeda waad leedahay, xitaa haddii aad xaaskada cuno afka u galisid.<sup>50</sup>

عَنْ جَرِيرِ بْنِ عَبْدِ اللَّهِ قَالَ بَايَعْتُ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ عَلَى إِقَامِ الصَّلَاةِ، وَإِيتَاءِ الزَّكَاةِ، وَالنُّصْحِ لِكُلِّ مُسْلِمٍ.

[أطرافه 524، 1401، 2157، 2714، 2715، 7204، تحفة 3226].

57. Jariir Bin Cabdillaahi wuxuu yiri: waxaan la baayactamay Rasuulkii Alle ﷺ inaan salaada oogaayo, zakadana la imaan doono, iyo inaan u naseexeeyo qof kastoo Muslim ah.<sup>51</sup>

جَرِيرَ بْنَ عَبْدِ اللَّهِ قَالَ فَإِنِّي أَتَيْتُ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قُلْتُ أَبَايُكَ عَلَى الْإِسْلَامِ. فَشَرَطَ عَلَيَّ وَالنُّصْحَ لِكُلِّ مُسْلِمٍ. فَبَايَعْتُهُ عَلَى هَذَا.

58. Jariir Bin Cabdullahi wuxuu yiri: waxaan u imid Nabiga ﷺ waxaan ku iri: waxaan kugula baayactama Islamka, wuxuuna shardi iigaga dhigay inaan u naseexeyo Muslim walbo, sidaas ayaana kula baayactamay.<sup>52</sup>

---

<sup>50</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 56, Saxiix

<sup>51</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 57, Saxiix

<sup>52</sup> Saxiix Al-Bukhaari, Xadiithka 58, Saxiix